# Xuquuqda Aadanaha Ee Biritish Kolombiya: Takoorka Jinsiga iyo Galmo ku Dhibaataynta

Warqaddaan xogsheegta ah waxaa loo sameeyey in ay kaa caawimto fahamka takoorka jinsiga (sex discrimination) ee Biritish Kolombiya. Haddii ad qabtid wax su'aalo ah, fadlan la xiriir **Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya**. Macluumaadka halka lagala xiriiri karo waxaa laga heli karaa dhammaadka warqaddaan xogsheegta ah.

Biritish Kolombiya waxay leedahay sharci ay ku ilaaliso kuna horumariso xuquuqda aadanaha. Sharcigaas waxaa loo yaqaan *Xeerka Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya* ama *Xeerka* (*BC Human Rights Code* or the *Code*). *Xeerku* wuxuu kaa ilaalinayaa in si xun laguu la dhaqmo ama laguu diido xaq ad leedahay jinsigaaga ama aqoonsiga jinsigaaga awgeed. Wuxuu kuu ogolaanayaa in ad dacwad u gudbisid **Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya** haddii ad rumeysan tahay in lagu takooray.

Waxa kaloo *Xeerku* kaa ilaalinayaa **aargoosi** haddii ad dacwad gudbisid, ama damacsan tahay in ad gudbisid ama si kale ugu lug leedahay. Waa **aargoosi** haddii qof ad dacweysay isku dayo in uu dhib kuu geysto ama si kale kaaga daba tago.

## Waa maxay takoorka jinsigu?

Takoorka jinsiga waxaa ka mid ah jinsiga (gender), uurka, iyo galmo ku dhibaataynta. Taas oo macnaheedu yahay in qof loo la dhaqmo si xun ama loo diido xaq u leeyahay, sababtuna ay tahay in qofkaasu yahay nin, naag, labeeb, qof jinsi baddashay ama aqoonsiga jinsigiisa awgeed.

Takoorka jinsigu wuxuu u dhici karaa siyaabo dhawr ah, oo ay ka mid yihiin:

- In laguu gu yeero magacyo jinsi nacayb ah (sexist names).
- In adeeg laguu diido.
- In lagu shaqaalaysiin waayo ama dallacsiin waayo, halka dadka kula midka ah la qoray ama la dallacsiiyey.
- In laguu hanjabay (bajiyey)
- In shaqada lagaa eryey

### Dumarka uurka leh ama ilmaha nuujinaya

Waa sharci darro in qof dumar ah lagu takooro sababtoo ah in ay uur leedahay, uur yeelan karto ama ilmo leedahay awgeed.

Hooyooyinka ilmaha xannaanaynayaa waxay xaq u leeyihiin in ay ilmahooda naaska ku nuujiyaan goobaha dadweynaha. Waa takoorid in lagu yiraahdo is astur ama meel kale ilmaha ku nuuji.

## Waa maxay galmo ku dhibaataayn?

Galmo ku dhibaatayni waa nooc ka mid ah jinsi takooridda (sex discrimination). Waa galmo ku dhibaatayn haddii uu qof si joogta ah kuu gu sameeyo ama yiraahdo waxyaabo cay iyo gaf ah. Waxay noqon karaan ereyo ama falal ku saabsan jinsigaaga (sex or gender-related).

### Waxaa jira noocyo badan oo galmo ku dhibaatayn ah:

- Taabasho adan doonayn
- Ereyo ama kaftan gaf ah oo lagu yiraahdo nin ama naag
- Ereyo ama codsiyo galmo adan doonayn oo lagu gu yiraahdo
- Qof jirkiis oo lagu dhaygago ama lagu yiraahdo hadalo aysan doonayn
- Muuqaalo ama sawirro galmo oo lagu tuso
- Qof la aflagaadeeyo (afka looga gafo) sababtuna ay tahay jinsigiisa awgeed

Dhibaatayntu waxay noqon kartaa jinsi takoorid (sex discrimination) xataa haddii aysan galmo ku saabsanayn. Taasu waxay dhici kartaa haddii uu qof kuu dhibaateeyo jinsigaaga (your gender) oo kaliya awgeed. Galmo ku dhibaatayntu waxay badanaaba ku dhacdaa dumarka, haseyeeshee waxay kaloo ku dhici kartaa ragga ama waxay ka dhex dhici kartaa xubnaha laba qof oo isku jinsi ah (same sex).

## Galmo ku dhibaataynta iyo awoodda

Galmo ku dhibaataynta waxaa loo tixgaliyaa ku xadgudub awoodeed. Haseyeeshee in dhibaatayni dhacdo shardi ma aha in ay jirto sinnaan la'aan awoodeed. Tusaale, qof shaqaale ah ayaa dhibaatayn kara qof ay wada shaqeeyaan, ama arday baa dhibaatayn kara arday ay isku fasal yihiin. Shardi ma aha in uu noqdo madax, horjooge ama macalim si arinta loogu tixgaliyo galmo ku dhibaatayn. Galmo ku dhibaataynta waxaa ku jiri kara sida uu u dhaqmo qof macmiil ah (customer or client).

## Sidee baan ku ogaanayaa in la iga galay dambi lid ku ah Xuquuqda Aadanaha?

Marka ad gudbinaysid dacwad ku saabsan *Xeerka Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya*, waa in ay jiraan **dhammaan arrimaha soo socda**:

- In si xun laguu la dhaqmay ama xaq ad leedahay laguu diiday.
- Waa in uu jiraa xiriir ka dhexeeya sida laguu la dhaqmay (si xun ama xaq laguu diiday) iyo jinsigaaga (your gender).
- Falku waa in uu ka dhacay meel ah sida goob shaqo, dukaan ama makhaayad, ama u dhexeeyo hantile guri iyo guri ijaarte (kireyste).

Dacwaddaada waa in ad gudbisid lix bilood gudohood marka falku dhaco dabadeed. (Xusuusnow: Waxaa jira marar aysan muddadaasu khusayn.) Markaad dacwad gudbisid waxaa bilaabmaya hannaan sharci oo la mid ah kan maxkamadda. Qofka dacwadda gudbiya waxaa loo yaqaan **dhibbane**.

Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya oo kooban, fadlan eeg warqadda xogsheegta ah ee ***Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya: Waxyaabaha ad u baahan tahay in ad ogaatid.***

## Halkee baan caawimaad ka heli karaa?

**Dhibbaneyaashu** meel kasta oo ay ka joogaan gobolka waxay macluumaad ka heli karaan **Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya**. Shaqaalaha jooga Rugta ayaa waxay kaa caawimi karaan fahamka *Xeerka Xuquuqda Aadanaha* ama sidii ad wax uga qaban lahayd dacwad xuquuqda aadanaha ah ee gobolka. Waxaa dhici karta in ad xaq u yeelatid adeegyo kaloo kala duwan. La hadal qof Rugta jooga si ad u ogaatid wixii ad xaq u leedahay.

### Rugta Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya (BC Human Rights Clinic)

300-1140 West Pender Street, Vancouver, B.C. V6E 4G1
Telefoon: 604 622-1100
Telefoon Lacag la'aan ah: 1 855 685-6222
Fakis: 604 685-7611
Bogga Internetka: www.BCHRC.net

---

Haddii adiga qof dacwad kaa gudbiyo, waxaa tahay **eedeysane**. **Eedeysaneyaashu** meel kasta oo ay ka joogaan gobolka iyo **dhibbaneyaasha** nawaaxiga Victoria waxay macluumaad ka heli karaan ayagoo la xiriiraya:

### Jaamacadda Victoria (University of Victoraia)

Law Centre Clinical Law Program
Qolka 225 – 850 Burdett Avenue, Victoria, B.C. V8W 1B4
Telefoon: 250 385-1221
Telefoon lacag la'aan ah: 1 866 385-1221
Iimeyl (E-mail): reception@thelawcentre.ca

Waxaa dhici karta in laguu diro **Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya** si ad dacwaddaada u gudbisid.

---

### Guddiga Xuquuqda Aadanaha Biritish Kolombiya (BC Human Rights Tribunal)

Qolka 1170 – 605 Robson Street, Vancouver, B.C. V6B 5J3
Telefoon: 604 775-2000
Telefoon lacag la'aan ah: 1 888 440-8844
Dadka wax maqalku dhimman yahay (TTY): 604 775-2021
Bogga Internetka: www.bchrt.gov.bc.ca

*Macluumaadka warqaddaan waxaa loogu talagalay baahiyaha macluumaadka guud oo kaliya. Looguma talagalin in uu ku siiso ama kuu baddalo latalin sharci.*